

Qiimeeyn: Maxey u micno tahay ilmahaaga?

Evaluation: What Does It Mean for Your Child? — Somali version

Qiimeeyntu waa howl wada socota oo ka caawisa waalidka iyo dugsiga si ay ogaadaan in ilmahoodu naafa leeyihiin. Sida hoos timaada sharciga loo yaqaan Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah Individuals with disabilities Education act (IDEA), Ilmaha naafada leh waa kuwa u qalma waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira. Ilmahu ma heli karo waxbarashada gaar ahaaneed iyadoon la qiimeeyn.

Waxaa laga qiimeeynayaa dhan walba ee looga tuhma in ilmahu naafa ka leeyahay. Waxaa la isu soo aruurinayaa warbixinno badan ee ku saabsan ilmaha marxaladooda iyo koritaankooda. Waxaa la eegayaa ilmaha awoodda iyo baahida ay leeyihiin. Waxaa laga imtixaamayaa garashada (cognitive), waxbarashada, dabeecada, jirka iyo koritaanka kale ee laxiriira. Qiimeeynta waxaa ka mid ah warbixinnada laga helay waalidka. Wargelinnadan oo dhan oo la isugu soo aruuriyey qiimeeynta ayaa waxaa loo isticmaalayaa in lagu ogaado:

- In ilmahu leeyahay naafo
- In ilmahu leeyahay baahi waxbarashada la xiriirta

Waa maxay sababta loo doonayo qiimeeynta?

Qiimeeyntu waxyaabo badan ayaa loo adeegsadaa:

1. Garasho. Waxaa lagu garanayaa in ilmahu dib u dhac ama naafa leeyahay oo uu u baahan yahay waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira.
2. U qalmid. Waxaa lagu ogaanayaa in ilmahu leeyahay naafo ka mid ah kuwa lagu xusay sharciga waxbarashada gaar ahaaneed (IDEA). Haduu ilmahu leeyahay naafadaa, waxuu u qalmaa waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira.
3. Qorsheynta qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed Individualized Education Plan (IEP). Qiimeeynta waxaa lagu helaa wargelinnada ka caawinaya waalidka iyo

shaqaalaha dugsiga in ay helaan qorsho waxbarasho gaar ahaaneed oo ku haboon ilmaha.

4. Xeelad tilmaan-bixin. Waxa loo adeegsadaa in lagu ogaado xeelad tilmaameysa sida ugu haboon ee ilmaha looga caawiyo waxbarashada.
5. Cabirka horumarka. Waxaa loo adeegsadaa in lagu ogaado ama lagu cabiro heerka ilmahu waxbarashada ka marayo iyo horumarka uu waxbarashada ka gaarayo.

Marka qiimeeynta la gaba gabeeyo, waa in waalidka la siiyaa koobbi natiijyada qiimeeynta iyo warbixin tuseysa sida lagu ogaadey in ilmahu u qalmo. Hadii uu ilmahu u qalmi waayo waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira, warbixinnadaa waxaa loo isticmaali karaa in lagu ogaado waxyaabaha kale ee waafajinta ah ee ilmahu u baahan yahay xagga waxbarashada caadiga ah.

Cabiraad nooc ah ayaa la isticmaalaa marka ilmaha la qiimeeynayo?

Hal imtixaan qura looma isticmaali karo in lagu ogaado in ilmahu leeyahay wax naafo ah ama uu leeyahay baahi xagga waxbarasho. Imtixaanno rasmi ah iyo kuwo aan rasmi aheyn, indha indheyn, warbixinnada waalidka laga helo iyo cabiraadyo kale oo la isu soo aruuriyay ayaa ka caawiya waalidka iyo dugsiga baahida ilmahu u leeyahay waxbarashada gaarahaaneed iyo howlaha la xiriira.

Imtixaannada waxaa lagu cabiraa kartida ama heerka uu ilmahu marayo. Iyadoo jawaabaha ilmahu bixiyo loo bar bar dhigayo su'aalo gaar ah. Waxaa lagu arkayaa sawir ah heerka uu ilmahu taagan yahay markaa. Natiijyada ka soo baxa imtixaannada rasmiga ah, waxaa lagu ogaadaa heerka uu ilmahu ka gaari karaa dugsiga. Waxaa kaloo lagu ogaadaa baahida qaaska ah uu ilmahu leeyahay.

Dugsigu waxuu ilmaha ka qaadayaa qiimeeyn gooni ah iyadoo la isticmaalayo warbixinno



Technical Assistance ALLIANCE
for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

laga helay meela rasmi ah iyo kuwo aan rasmi aheyn. Inkastoo imtixaannadu muhiim yihiin, qiimeeynta waxaa kaloo ka mid ah, warbixinno kale sida:

- Warbixin xagga caafimaadka
- Horumarka ilmaha gaarayo oo loo bar bar dhiga horumarka ilmaha kale ee caadiga ah
- Iyadoo la eegayo sida ilmahu u dhaqmo marka uu dugsiga joogo, guriga joogo ama jaaliyadda joogo
- Wareysi la la yeesho waalidka iyo shaqaalaha dugsiga.

Waalidka iyagaa si wanaagsan uga xog haya koritaanka ilmahooda iyo waxyaabaha ay u baahan yihiin. Marka la isu aruuriyo warbixinnada laga helo waalidka, imtixaannada iyo qiimeeynta kale, ayaa waxaa loo isticmaalayaa in lagu gaaro go'aan ku haboon waxbarashada ilmaha

Imtixaanno nooc ee ah ayaa diyaar ah?

Waxaa jira imtixaanno badan oo uu dugsigu isticmaali karo in uu ku cabiraa horumarka. Waxaa jira shuruudo yar ee waalidku ay ogaadaan tahay.

Imtixaan kooxeed

Imtixaan ah howl ay ilmuhu si koox ah wax u wada qabanayaan, looma isticmaali karo in lagu ogaado in ilmahu u qalmo waxbarashada gaar ahaaneed. Howsha kooxdu wada qabaneysa waxey warbixin naga siineysaa, sida ilmahu u fulinayo howsha, marka loo bar bar dhigo ilmaha la asaagga ah ama la heerka ah. Laakiin laguma ogaan karo kartida iyo baahida waxbarasho ee qaaska u ah ilmaha.

Imtixaan shaqsiyeed (Individual tests)

Imtixaannada shaqsiga ah ee ilmaha laga qaada waa kuwo lagu ogaado kartida iyo baahida waxbarasho ilmahu leeyahay.

Qiimeeynta ku saleysan manaahijta ama qiyaasta ku saleysan manaahijta

Curriculum-based assessments (CBAs) or Curriculum-based measurements (CBMs)

Imtixaannadan waa kuwo shaqaalaha dugsigu la yimaado ee loogu tala galay in lagu eego horumarka ilmahu ka gaarayo maaddo qaas ah ee macalinka fasalka ku bara ilmaha. Waa kuwo wax tara macalinka iyo waalidka si ay u ogaadaan in ilmahu wax baranayo. Hase ahaatee, waa in aan marnaba loo isticmaalin in lagu ogaado in ilmahu u qalmo waxbarashada gaar ahaaneed.

Imtixaannada caadiga ah (Standardized tests)

Imtixaannada caadiga ah waa kuwo dad taqasus ah la yimaadeen ee loogu tala galay kooxo arday tira badan leh. Imtixaannadan waxaa loo bixiyaa habab qaas ah.

Imtixaannadan waxaa lagu qiyaasaa waxa ilmuhu horey u soo bartay (horumarka), ama lagu ogaadaa waxa ilmuhu horey u gaari karo (kartida).

Imtixaannada qiyaasta-caadiga la tix raaco (Norm-Referenced tests)

Imtixaannada qiyaasta-caadiga ee loo bar bar dhiga waa imtixaannada caadiga ah ee ilmaha laga qaada iyadoo natiijada la bar bar dhigayo kuwa ilmaha kale ee la heerka ah. Waxey muujinayaan heerka ilmahu marayo marka loo bar bar dhigo ilmaha kale ee la d'ada ah ama la heerka ah.

Imtixaannada cabir-saleynta la tix raaco (Criterion-referenced tests)

Imtixaannadan waxaa lagu cabiraa waxyaabaha ilmahu sameyn yaqaan ama kartida qaaska ah uu leeyahay. Imtixaannada cabir saleynta laguma qiimeeyo halka uu ilmahu ka taagan yahay kooxda. Waxaa lagu eegaa horumarka ilmaha iyadoo lagu cabirayo in loo bar bar dhigo waxbarashada caadiga ah. Waxaa laga yabaa in la is bar bar dhigo horumarka uu ilmahu hadda gaarayo iyo kuwii uu horey u gaaray si loo ogaado horumarka u dhexeeya uu gaarayo.

Hab nooc ee ah ayaa la isticmaalaa si loo doorto imtixaanka?

Dugsiyadu waxey qadariyaan cunsurro badan markey dooranayaan imtixaan loo isticmaalo in lagu qiimeeyo. Kuwan hoos ku qoran waa kuwo ka mid ah:

- Imtixaannadu waa in ay ahaadaan kuwo lagu kalsoon yahay. Imtixaanka waxaa lagu kalsoonaan karaa, marka natiijyo isku mid lagu gaarayo marka waqtiyo kala duwan la qaado ama dad kala duwan qiimeeyaan. Haddaan loo fasirin, waalidka waxuu weydiin karaa in imtixaanka ilmahooda laga qaadayo yahay mid lagu kalsoon yahay.
- Imtixaannadu waa in ay ahaadaan kuwo sharci ahaan la isticmaali kara. Imtixaannadu waxey ansax yihiin haddey cabbirayaan waxyaabihii loogu tala galay in ay cabbiraan.
- Imtixaannadu waa in si sax ah u muujinayaan awoodda dabiiciga ee xagga aqoonta ama horumarka ilmaha leeyahay. Waa in marka hore imtixaannada caadiga ah lagu ogaadaa in ilmahu u baahan yahay imtixaannadan qaaska ah. Waa in dad tababar iyo aqoon u leh bixiyaan imtixaannadan.
- Waxyaabaha ka mid ah imtixaannada iyo qiimeeyntu waa in ay ilmaha u takoorin dhaqan ahaan ama midab ahaan. Waa in ilmaha lagu siiyaa imtixaannada luqadooda hooyo in suuro gal noqon weydo moyee.

Waxyaabaha qaarkood oo ay ka mid yihiin feejignaanta, walwalka, doonidda iyo fahamka imtixaankaba lug ayey ku yeelan karaan natiijada.

Waa maxay qiimeeynta aasaasiga?

In kastoo imtixaannadu qeyb muhiim ah oo qiimeeynta ka mid ah yihiin, mararka qaarkood natiijyada ka soo baxa laguma ogaan karo kartida ilmahu leeyahay ama waxyaabaha uu u baahan yahay in uu barto. Qiimeeynta aasaasiga waxaa lagu eegaa sida ilmahu u mucaamiltamo marka uu guriga joogo, marka uu dugsiga joogo iyo marka uu xaafadda joogo.

Qiimeeynta aasaasiga ee ardada qaarkood waxa ka mid ah, in la eego akhriskooda, khoritaankooda iyo kartida xisaabta. Qaarkoodna waxaa la qiimeeyaa in ardeygu keligii baska raaci kara, lebisano karo iyadoon la caawin ama uu lacag maamuli karaa.

Waa maxay qiimeeynta dabecadda aasaasiga?

Marka ilmahu dabecad daran yahay ee ka hor tegidda caadiga ah ku shaqeyn weydo, qiimeeynta dabecadda aasaasiga (Functional Behavioral Assessment FBA) waxey kooxda ku helaan aqbaaro siyaado ah oo ka caawinaya in ay helaan qorsho ku haboon oo looga hor taga dabecad darrada. Qiimeeyn dabecad aasaasi waxaa ka mid ah:

- Fasiraad qeexan oo ah dabecadda xun.
- Ilmaha oo la indha indheeya iyadoo meela kala duwan iyo waqti kala duwan jooga. Indha indheentaa waa in lagu ogaadaa (1) Maxaa ka dhacayay jowiga uu ilmahu joogay marka dabecad xumada bilaabatay, (2) dabecad xumada uu ku dhaqaaqay waxey aheyd, iyo (3) waxuu dabecad xumada ula dan lahaa in uu ku gaaro.
- Dhex dhexaadin looga hor tagayo dabecad xumada iyo in la baro xirfad dabecadeed.

Marka qiimeeynta dabecadda aasaasiga la gaba gabeeyo, natiijyada ka soo baxda waxaa loo isticmali karaa in lagu helo qorsho dhexdhexaadin dabecad wanaag ah ama loogu helo hamiyad dabecadeed oo ka mid ah qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed.

Sidee loo isticmaalaa natiijyada ka soo baxda qiimeeynta?

Marka qiimeeynta ilmaha la gaba gabeeyo, waalidka waxuu la kulmayaa koox taqasus qibrad leh si ay uga wada hadlaan natiijyada. Kooxdani waxey go'aansaneysaa in ilmahu leeyahay naafo u qalma kuwa ku xusan sharciga waxbarashada dadka naafada ah (IDEA). Degmada dugsiga waa in ay siisaa waalidka koobbi warbixin natiijyada ah. Waxey kaloo in ay waalidka siisaa tahay, iyadoo qoraal ah, sida ay kooxdu ku gaartay go'aanka ah in ilmahu u qalmo ama u qalmin howlaha.

Haddii ilmaha lagu qiimeeyo in uu u qalmo waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira, talaabta ku xigta waa in ilmaha loo helaa qorsho waxbarashada gaar ahaaneed oo ka haqab tireysa baahida waxbarasho uu leeyahay. Goolka iyo

qasdiga kooxdu dooneyso in la gaaro, waa in uu ahaadaa mid si toos ah ula xiriira baahida iyo kartida ilmuhu leeyahay ee lagu ogaaday qiimeeynta.

Waa muhiim in waalidku fahmo natiijyada ka soo baxa qiimeeynta inta aan la bilaabin qorsheynta waxbarashada gaar ahaaneed. Waxey weydiisan karaan in qof taqasus ah u micneeyo natiijyada ka soo baxday qiimeeynta.

Waa muhiim in aad dib u sii darastaa gaba gabada warbixinta qiimeeynta inta aan lagu dhaqaaqin qorsheynta waxbarashada gaar ahaaneed. Waalidiinta intooda badan waxay go'aansadaan, in ay natiijyada la tagaan guriga ama meel ay ku kalsoon yihiin oo ay dib ugu laabtaan inta aysan ka qeyb qaadan kulanka lagu qorsheynayo waxbarashada gaar ahaaneed.

Goormaa ardeyda dib loo qiimeeyaa?

Ardeyda ka qeyb qaadata waxbarashada gaar ahaaneed waa in dib loo qiimeeyaa:

- marka xaaladu u baahan tahay dib u qiimeeyn, ama
- marka waalidka ilmaha ama macalinka codsado, laakiin lagama badin karo sanadkiiba mar

In waalidka iyo shaqaalaha dugsiga isla grtaan in aan qiimeeyn loo baahneeyn moyee, waa in sadexdii sanaba mar qiimeeyn la sameeyaa.

Natiijyada ka soo baxda waa mid lagu eegayo horumarka ilmahu ka gaarayo goolkii loo qabtay ee qorshaha ku xusnaa, iyo in lagu ogaado in ilmahu weli u baahan yahay waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira.

Dib u qiimeeynta waxaa ka mid ah iyadoo la eegayo xaaladda markaa ilmahu ku sugan yahay, waxii warbixin ah ee waalidka laga helayo, qiimeeyn fasalka ah, iyo indha indheyn kooxdu ku go'aansaneysa in warbixinno siyaado ah loo baahan yahay si lagu gaaro go'aanka ah in ilmahu weli u baahan yahay waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira. Haddii ay kooxdu go'aansato in ann loo baahneeyn warbixinno siyaado ah, si qoraal ah ayaa waalidka lagu war gelinayaa. Dabadeed looma baahna in qiimeeyn siyaado ah lagu sameeyo ilmaha. In waalidka iyo macalimiinta codsadaan moyee.

Su'aalo nooc ee ah ayaan weydiin karaa marka la iga codsado qiimeeyn ama dib u qiimeeyn?

1. Imtixaanno ama qiimeeyn nooc ee ah ayaa ilmaheyga la la doonayaa?
2. Ma qof baa indha indheynaya ilmaheyga marka uu fsalka fadhiyo iyo miyaa la wareysanayaa macalimiinta wax barta?
3. Qofka qiimeeynaya ilmaheyga, ma qof qibrad u leh baa xaaladda ilmaheyga? Miyuu horey u qiimeeyay ilma kale ee kuweyga la xaalad ah?

4. Laxaad darada ilmaheyga, miyeey sabab u noqon kartaa in uu ku baasi waayo imtixaanada ama kuwo ka mid ah?
5. Ilmaheyga ma u baahan yahay qof u turjuma?
6. Qofka imtixaannada qaadaya, miyuu garanayaa dhaqankeyga
7. Imtixaannadu ma kuwo ilmaheyga la heer iyo d'a ah baa? Hadii ilmaheyga horey fasalka dib loogu celiyey, sidee loo qadarinayaa natiijyada ka soo baxa imtixaanka?
8. Warbixin nooc ee ah ayey kooxdu iga dooneysa?
9. Maxaa ilmaheyga loo qabanayaa si uu ugu kalsoonaado imtixaannada?

Maxaa dhacaya haddaan ku qanci waayo natiijyada qiimeeynta dugsiga?

Haduu waalidku ku qanci waayo natiijyada ka soo baxda qiimeeynta dugsiga ilmaha ka qaaday, waxay xaq u leeyihiin in ay codsadaan qiimeeyn qof ka madax bannaan dugsiga. Taasoo loo yaqaan independent education evaluation (IEE). Qiimeeyntan madax bannaan waxaa qabta dad qibrad u leh oo aan u shaqeyn dugsiga. Degmada dugsiga waa in ay waalidka siisaa liis magacyo ee dadka kale ee ka madax bannaan ee qiimeeyntan qabta. Degmadu waa in ay lacagta ku baxda dadkaa madax bannaan bixisaa ama qabataa kulan ay ku tiigsaneyso hab raaca sharciga (due process hearing) oo ay ku muujineyso in qiimeeyntii ay iyagu sameeyeen tahay mid ku haboon ilmaha.

Hadii kulankaa lagu go'aamiyo in qiimeeyntii degmada dugsiga qabatay taha mid ku haboon ilmaha, waalidka waxuu weli xaq u leeyahay inuu ilmaha ula tagaa dadkaa ka madax bannaan dugsiga. Hase ahaatee, dugsiga kama waajib aha lacagta ku baxda.

Haduu waalidku kala yimaado qiimeeyn dadkaa madax bannaan, oo ay qiimeeyntaa u qalanto waxyaabaha dugsiga ka doonayo, kooxda qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed waa in ay qadarisaa qiimeeyntaa. Natiijyada ka soo baxda qiimeeynta madax bannaan waa in kooxdu u qadarisaa marka la qorsheynaya qorshaha waxbarashada madax bannaan.